



Dhulgariir

Gobolka Washington waa wadan dhulgariir.
Marka dhulku bilaabo inuu gariiro, “Is Tuur, Hoos Gal oo Xejiso.”

Is Tuur, Hoos Gal oo Xejiso

- Marka aad dareentid dhulgariir, **IS TUUR** oo **HOOS GAL** miis adag. Ka fogow daaqadaha iyo alaabooyinka sida khaanadaha buugaagta ee soo dhici kara. **XEJISO** miiska. Haddii miisku dhaqaaqo, la dhaqaaq. Ha ordin — joog meesha aad joogtid. “Is Tuur, Hoos Gal oo Xejiso.”

Isu diyaari dhulgariir

- Wax ku xidh ama ku adkee qalabka guriga iyo wiciyadda ama farnijarka dhaadheer ee soo dhici kara. Albaabada khaanadaha ama aramaajooyinka ku samee handaraab ama qabatooyin (latches) si waxyaabaha ku jira aanay u soo daadan.
- Raadi sida aad u hagaajin kartid gurigaaga si looga badbaadiyo khasaare dhulgariir.
- Sameyso qof lala xidhiidho oo ka baxsan aaggaaga oo diyaari lambarada teleefonada. Kaasi waa qofka ay xubnaha qoysku wici doonaan marka aad kala luntaan.
- Guriga ku lahow meel lagu kaydiyo alaabooyinka degdegga oo u sheeg dadka kale meesha ay tahay.

Inta uu socdo dhulgariir

Haddii aad gudaha joogtid:

- Joog gudaha. Hoos gal miis adag oo xejiso. Haddii uu dhaqaaqo, la dhaqaaq. Ka fogow daaqadaha, khaanadaha buugaagta, qaboojiyeyaasha, muraayadaha culus, dhirta soo laadlaada iyo alaabta kale ee soo dhici karta. Ha u bixin dibadda ilaa gariirku joogsado.
- Haddii aad joogtid dukaan ama goob dadweyne oo sixmad ah ama laga buuxo, ha u cararin iridda bixista. Ka dhaqaaq khaanadaha alaabta ee ay yaaliin alaabooyin kugu soo dhici kara, oo “is tuur, hoos gal oo xejiso.”
- Haddii aad joogtid tiyaatar ama istaydiyam ama garoonka ciyaaraha, joog kursigaaga, gacmahaaga saar madaxaaga oo ku badbaadi ama hoos gal kursiga. Ha bixin ilaa gariirku joogsado.

Haddii aad joogtid dibadda:

- Haddii aad joogtid dibadda, u dhaqaaq meel banaan oo ka fog dhirta, calaamadaha, dhismeyaasha ama xadhkaha iyo tiirarka korontada ee soo dhacay.

Haddii aad joogtid aagga badhtamaha magaalada:

- Haddii aad maraysid jidka lugta oo u dhow dhisme dheer, hoos gal iridda dhismaha ama gal aagga hore ee dhismaha (lobby) si aad uga badbaadid labanka, quraarada/qarshada iyo wax kale oo soo dhacaya.

Haddii aad wadid baabuur:

- Haddii aad wadid baabuur, si tartiib ah u dhaqaaq dhinaca wadada oo joogso. Iska ilaali jid hoos maraya jid kale, khadadka korontada iyo halista kale. Ku jir gudaha baabuurka ilaa gariirku joogsado.

Haddii aad saaran tahay kursiga curyaanka:

- Haddii aad ku jirtid kursiga curyaanka, ku jir. U dhaqaaq gabood ammaan ah haddii ay suurtoagal tahay, xidh shaagagaaga oo madaxaaga ku badbaadi gacmahaaga.

Ka dib dhulgariirka

- Haddii lagaa saaray guriga, sug ilaa lagu sheego inay ammaan tahay ka hor inta aanad guriga ku noqon.
- Taxadir yeelo marka aad galaysid dhismeyaasha. Ka fogow khadadka korontada ee soo dhacay.
- Jidhkaaga iyo dadka kale ee kuu dhow ka fiiri dhaawacyo.
- Isu diyaari gariirada dambe ee ku xiga gariirka hore.
- Teleefonka u isticmaal kaliya si aad u soo sheegtid xaalad degdeg ah oo nafta halis galinaysa.
- Ha kaxeyn baabuur marka aanay lagama-maarmaan ahayn.
- Haddii aad urusid gaas ama naqaska la shito ama aad maqashid sanqadh “fiish” leh ama sanqadha hawo fakanaysa —fur daaqad oo ka bax dhismaha. Xidh barta weyn ee laga xidho gaasta oo dhan (main gas valve) ee ku taala dibadda guriga.
- Soo fiiri deriska, gaar ahaan dadka waayeel ama naafo ah.
- Isku day inaad wacdid teleefonkaaga la-xidhiidhista ee ka baxsan aagga.
- Dhegayso raadyahaaga.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-035
Somali